



Orientation to Ontario

GUNNOOYINKA IYO CAAWIMAADA BULSHADA

GUNNOOYINKA

Caymiska Shaqada (EI)

Waxaad u qalmi kartaa gunnooyinka EI haddii aad lumiso shaqadaada sabab la xariirta xaalado ka baxsan awoodaada - sida, shaqo yari jirta, shaqo ka cayrin xiliyeed ama mid baaxad wayn. Si aad ugu qalanto EI, waa inaad shaqaysay saacadaha caymiska lagu heli karo gudaha Canada 52 asbuuc ee lasoo dhaafay.

Si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku saabsan EI, booqo Service Canada barta

servicecanada.gc.ca ama findlink.at/EI-app

Qorshaha Beeshinka ee Canada (CPP)

Marka aad gaarto 85 sano waxaad u qalmi kartaa inaad hesho lacagta hawlgabka ee CPP. Waa inaad ugu yaraan hal qoondo ku darsataa qorshaha intii aad ka shaqaynaysay Canada noloshada. Waxaad awoodi kartaa inaad qaadata CPP gaaga inta u dhaxaysa da'aha 60 iyo 64, laakiin lacagaha ayaa ka yaraan doona sida caadiga ah. Haddii aad dib u dhigto qaadashada CPP gaaga, lacagaha ayaa kordhi kara.

Si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku saabsan CPP, booqo Service Canada www.servicecanada.gc.ca

ama findlink.at/cpp

Gunnada Kaydka Waayeelka (OAS)

Tani waa gunno bil kasta la siiyo dadka reer Canada ee jira 65 sano ama ka wayn. Si aad ugu qalanto, waa qasab inaad ku noolayd Canada ugu yaraan 10 sano kadib marka aad gaarto 18 sano.

Si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku saabsan OAS, booqo Service Canada servicecanada.gc.ca

ama findlink.at/oldagesecu

Gunnada Ilmaha ee Canada (CCB)

CCB waa lacag bille ah oo ay bixiso dawlada Federaalka ah lana siiyo waalidiinta iyo masuuliyiinta kale ee ilmaha si ay ugu baxshaan qarashaadka korinta ilmaha. Waa inaad codsataa gunnada. Cadadka gunnada ayaa lagu saleeyaa heerka dakhliga.

Si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku saabsan CCB, booqo Wakaalada Dakhliga ee Canada oo aad ka helayso cra-arc.gc.ca ama findlink.at/cra-bnfts

Gunnada Daryeelka Guud ee Ilmaha (UCCB)

UCCB waa lacag bille ah oo ay dawlada federaalka ah ku bixiso ilmo kasta oo ka yar 6 sano. Lacagtaan ayaa la siiyaa qoysaska si looga caawiyo qarashka daryeelka ilmaha. Gunnada waxaa helaaya dhammaan qoysaska, maaha keliya kuwa adeegsada daryeelka ilmaha.

Si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku saabsan UCCB, booqo Service Canada servicecanada.gc.ca ama findlink.at/UChildCB

CAAWIMAADA BULSHADA

Ontario Works (OW)

Barnaamijka Ontario Workswuxuu taageero dhaqaale siiyaa dadka qaba baahida dhaqaale ee ku meel gaarka ah. Barnaamijku wuxuu sidoo kale taageero ka baxshaa helitanaka shaqo.

Si aad u hesho xog badan oo ku saabsan OW, booqo Wasaarada Carruurta, Bulshada iyo Adeegyada Bulshada oo aad ka helayso ontario.ca ama findlink.at/SocialAssi

1-855-626-0002

<https://orientationontario.ca>

Funded by / Financé par:

Barnaamijka Taageerada Naafada ee Ontario (ODSP)

Barnaamijkaan wuxuu caawiyaa dadka naafada ah ee qaba baahida dhaqaalaha. ODSP ayaa sidoo kale caawiya dadka naafada ah ee awooda shaqada inay helaan shaqo.

Si aad u hesho xog badan oo ku saabsan ODSP, booqo Wasaarada Carruurta, Bulshada iyo Adeegyada Bulshada oo aad ka helayso ontario.ca ama findlink.at/Ont-DSP

MA OTAHAY?

Da'da gunnada OAS lagu bilaabo ay mar kasta isbadesho. Dadka dhashay sanadkii 1958 iyo kadib ayuu saamaynayaan isbadelkaan, maadaama da'da u qalmida ay kordhayso.

